

Yoolka 1. IS-DIFAACIDDA IYO HORUMARINTA HOGGAAMINTA	
Sharaxaad	
Marka la gaaro Sebtembar 30, 2031, dadka qaba koriinka naafooyinka (dhallinyaro iyo dad waaweyn) iyo qoysaskooda waxay heli doonaan fursado badan oo ay ku gaaraan agab waxbarasho iyo horumarinta xirfadaha kuwaas oo kor u qaadaya is-difaacidda iyo hoggaaminta bulshada, sida uu dhigayo Sharciga Federaalka ee Koriinka Naafooyinka. Golaha wuxuu horumarin doonaa dadaallada wacyigelinta, dhisidda iskaashiyada, iyo isku xirka shabakadaha, isaga oo ballaarinaya fursadaha qof walba.	
Ujeeddooyinka	
1	<p>SAM iyo A4R</p> <p>Marka la gaaro Sebtembar 30, 2031, 150 qof oo qaba koriinka naafooyinka (tirinta aan soo noqnoqonayn) ayaa kordhin doona aqoontooda iyo xirfadahooda iyagoo ka qaybgalaya kulammo tababaro ah. Tababaradani waxay taageeri doonaan dadka qaba koriinka naafooyinka si ay u noqdaan tababarayaal ama soo-jeediyeyaal iyo inay ka qayb qaataan isbahaysiyo. Guud ahaan, hawlahani waxay gaari doonaan heer qanacsanaanta ka-qaybgalayaasha oo dhan 90% iyo koror 10% ah oo ku yimaadda cabbirrada la sameeyo ka hor iyo ka dib ee madaxbannaanida, wax-soo-saarka, is-go'aaminta, isdhexgalka, iyo ka-qaybgalka (IPSII). Ujeeddadani waxay buuxinaysaa shuruudaha Is-Difaacidda ee ku xusan Sharciga Koriinka Naafooyinka.</p>
2	<p>Hoggaaminta (Ka-qaybgalayaasha Dejinta Siyaasadaha)</p> <p>Marka la gaaro Sebtembar 30, 2031, 125 qof oo qaba koriinka naafooyinka iyo xubnaha qoysaskooda (tirinta aan soo noqnoqonayn) ayaa dhammaystiri doona 128 saacadood oo tababar hoggaamineed ah oo lagu bixinayo qaabab fool-ka-fool ah, muuqaal ah (virtual), isku-dhafaan, iyo onlayn ah. Waxaa la gaari doonaa heer qanacsanaanta ka-qaybgalayaasha oo dhan 90%, iyo sidoo kale koror 10% ah oo ku yimaadda madaxbannaanida, wax-soo-saarka, is-go'aaminta, isdhexgalka, iyo ka-qaybgalka (IPSII) ee ka-qaybgalayaasha, sida lagu cabbiray qiimaynada la sameeyo ka hor iyo ka dib.</p>
3	<p>Wacyigelin haddii maalgelin la helo</p> <p>Marka la gaaro Sebtembar 30, 2031, 100 qof oo qaba koriinka naafooyinka iyo xubnaha qoysaskooda (tirinta aan soo noqnoqonayn) ayaa sannad kasta dhammaystiri doona 24 saacadood oo tababar wacyigelin ah, iyadoo ugu yaraan 25 qof (5 qof sannadkii) ay iska diiwaangelin doonaan Nidaamka Ka-dhaafitaanka Adeegyada Ku Salaysan Guriga iyo Bulshada (Home and Community-Based Waiver System). Ugu yaraan 90% ka-qaybgalayaasha ayaa sheegi doona qanacsanaanta adeegga, iyo koror 10% ah oo ku yimaadda madaxbannaanidooda, wax-soo-saarkooda, is-go'aamintooda, isdhexgalkooda, iyo ka-qaybgalkooda (IPSII) bulshada dhexdeeda, sida lagu cabbiray qiimaynada la sameeyo ka hor iyo ka dib.</p>

Yoolka 2. SHAQADA	
Sharaxaad	
Marka la gaaro Sebtembar 30, 2031, dhallinyarada iyo dadka waaweyn ee qaba koriinka naafooyinka waxaa si gaar ah loogu taageeri doonaa doorashooyinkooda adeegyo iyo fursado, oo ay ku jiraan helitaanka, sii haysashada, iyo horumarinta shaqo iskood u shaqaysi ah iyo	

shaqooyin tartan furan ku salaysan isla markaana loo dhan yahay, iyagoo weli sii haysanaya helitaanka dheefaha kale ee muhiimka ah.	
Ujeeddooyinka	
1	Marka la gaaro Sebtembar 30, 2031, 100 arday oo ku jira da'da kala-guurka iyo dad waaweyn oo qaba koriinka naafooyinka (tirinta aan soo noqnoqonayn) ayaa noqon doona kuwo iskood u shaqeysta ama ka shaqeeya fursado shaqo oo kala duwan oo tartan furan ku salaysan isla markaana loo dhan yahay, iyagoo adeegsanaya habka daahfurka (discovery process) iyo habab qofka udub-dhexaad u ah. Waxaa la gaari doonaa heer qanacsanaanta ka-qaybgalayaasha oo dhan 90%, waxaana la cabbiri doonaa saacadaha la shaqeeyay, mushaharka, iyo dheefaha la helay. Waxaa jiri doona koror ku yimaadda madaxbannaanida, wax-soo-saarka, is-go'aaminta, isdhexgalka, iyo ka-qaybgalka (IPSII), sida lagu cabbiray qiimaynada la sameeyo ka hor iyo ka dib.

Yoolka 3. WAXBARASHADA, KHAYRAADKA, CILMI-BAARISTA, IYO HAGAJINTA JOOGTADA AH	
Sharaxaad	
Marka la gaaro Sebtembar 30, 2031, Golaha wuxuu sii ahaan doonaa kayd heer qaran laga aqoonsan yahay oo ay si fudud ku heli karaan dadka, kana kooban macluumaad, waxbarasho, iyo agab tababar oo tayo sare leh laguna bixiyo qaabab kala duwan. Dadka qaba koriinka naafooyinka iyo qoysaskooda, iyo sidoo kale taageerayaashooda, waxay horumarin doonaan aqoontooda iyo xirfadahooda iyagoo ka faa'iidaysanaya agabyada waxbarashada iyo tababarka ee socda kuwaas oo taageeraya yoolalka Sharciga Federaalka ee Koriinka Naafooyinka. Goluhu wuxuu maalgelin doonaa cilmi-baaris lagu qiimeeyo natiijooyinka Sharciga Koriinka Naafooyinka iyadoo la adeegsanayo habab sahamin tayo-ku-saleysan iyo tiro-koob ku saleysan, waxaana si joogto ah dib loogu eegi doonaa hab-dhaqannada Golaha, iyadoo si joogto ah loo sii horumarinayo.	
Ujeeddooyinka	
1	Daabacaadaha, Websaytka, iyo Koorsooyinka Onlaynka ah Websaytyada: Marka la gaaro Sebtembar 30, 2031, ugu yaraan 2,000 qof ayaa iska diiwaangelin doona koorsooyinka onlaynka ah ee Golaha. Dadka isdiiwaangelinaya waxaa ka mid noqon doona dadka qaba koriinka naafooyinka, xubnaha qoysaska, xirfadlayaasha, taageerayaasha, iyo ardayda. Khayraad waxbarasho oo kale ayaa lagu heli doonaa qaabab kala duwan, oo ay ku jiraan noocyo daabacan. Qayb ka mid ah isticmaalayaasha ugu dambeeya ayaa sheegi doona heer qanacsanaan oo ah 90% iyo koror 10% ah oo ku yimaadda madaxbannaanida, wax-soo-saarka, is-go'aaminta, isdhexgalka, iyo ka-qaybgalka (IPSII).
2	Cilmi-baarista Macaamiisha ah Marka la gaaro Sebtembar 30, 2031, 750 qof oo qaba koriinka naafooyinka, xubnaha qoysaska, iyo/ama qoysaska guud ayaa laga qaadi doonaa sahan ku saabsan arrimaha muhiimka ah iyo mowduucyada siyaasadeed ee saameeya dadka reer Minnesota ee qaba koriinka naafooyinka. Natiijooyinka daraasadda waxaa lagu soo bandhigi doonaa iyadoo la adeegsanayo hababka tirakoobka ee guud ahaan la aqbalay.
3	Hagaajinta Joogtada ah

	<p>Marka la gaaro Sebtembar 30, 2031, 50 qof oo qaba koriinka naafooyinka iyo xubnaha qoysaskooda ayaa ka qayb qaadan doona shan mashruuc oo tijaabo ah oo ku salaysan baahiyaha isticmaalayaasha si loo aqoonsado hagaajinta joogtada ah ee habraacyada, kuwaas oo kordhinaya qanacsanaanta macaamiisha isla markaana horumarinaya madaxbannaanida, wax-soo-saarka, is-go'aaminta, isdhexgalka, iyo ka-qaybgalka (IPSII). Ujeeddadani waxay ka kooban tahay mashruucyo hagaajin joogto ah iyo xaqiijinta sannadlaha ah ee natiijooyinka waxqabadka.</p>
4	<p>Masiibooyinka Dabiiciga ah iyo Xaaladaha Degdegga ah (miisaaniyad ma leh) Ujeeddada Baahiyaha Soo Baxaya: Marka la gaaro Sebtembar 30, 2031, Goluhu wuxuu ka jawaabi doonaa baahiyaha soo baxa ee ka dhasha xaaladaha degdegga ah ee aan la saadaalin karin, oo ay ku jiraan masiibooyin bayoolojiyeed, kiimikooyin, masiibooyin dabiici ah, weerarro argagixiso, ama xaalado kale oo degdeg ah oo ay sidaas u aqoonsadaan Hay'adda Federaalka ee Maareynta Xaaladaha Degdegga ah (Federal Emergency Management Agency) ama hay'ad la xiriirta oo ka jirta gobolkeenna. Haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah, Goluhu wuxuu siin doonaa macluumaad, waxbarasho, iyo tababar 100 qof oo qaba koriinka naafooyinka iyo qoysaskooda, iyadoo la gaari doono heer qanacsanaan oo ah 90%.</p>
5	<p>Tababarka Shirarka (haddii maalgelin la helo) Marka la gaaro Sebtembar 30, 2031, wadar ahaan 1,500 qof oo qaba koriinka naafooyinka, xubnaha qoysaska, taageerayaasha, iyo xirfadlayaasha ayaa ka qayb geli doona 50 shir oo tababar ah si ay u dhistaan aqoon iyo xirfado kor u qaadaya madaxbannaanida, wax-soo-saarka, is-go'aaminta, isdhexgalka, iyo ka-qaybgalka bulshada (IPSII), iyadoo la gaari doono heer qanacsanaan oo guud oo ah 90%.</p>

English	Somali Translation
Proposed Five-Year Plan Goals and Objectives	Yoolalka iyo Ujeeddooyinka Qorshaha Shanta Sano ee La Soo Jeediyey